

**Fahmidda Nidaamka Waxbarashada &
Tababarka ee Victoria
(Understanding the Victorian Education
& Training System)**

**Tilmaame Loogu
talo-galay dadka
dhallin-yarada ah
ee dhawaanta
yimid**

Qaybta 2aad

Buug-yar oo macluumaad ku jiro oo loogu talo-galay inuu kaafiyo baahida macluumaad ee dadka dhallin-yarada ah oo ka soo kala jeeda asallo dhaqaneed iyo luqadeed kala duwan.

Waxaa soo saaray Dadka Dhallin-yarada Qaxootiga ah iyo Kooxda Shaqaysa ee Kala-guurka (Refugee young People and Transition Working Group) ayadoo la kaashanaysa Xarunta Arrimaha Dhallin-yarada Dhaqannada-badan 2003 (Centre for Multicultural Youth Issues - CMYI)

Tilmaamahan loogu talo-galay dadka dhallin-yarada ah waxay ahayd tallaabo ay qaadday Xarunta Arrimaha Dhallin-yarada Dhaqannada-badan, waxaana maalgalisey Wasaaradda Socdaalka iyo Arrimaha Dhaqannada-badan iyo Dadka Asaliga ah (Department of Immigration and Multicultural and Indigenous Affairs), waxaana markii kowaad la daabacay 1998dii.

Qaybtan hadda socota waxaa cusboonaysiiyey oo daabacday xubno ka tirsan Dadka Dhallin-yarada Qaxootiga ah iyo Kooxda Shaqaysa ee Kala-Guurka ee Guddiga Qorshaynta Dejinta Victoria (Victorian Settlement Planning Committee), ayagoo la kaashanaya Xarunta Arrimaha Dhallin-yarada Dhaqannada-badan (Centre for Multicultural Youth Issues).

Mahadnaq weyn waxaa loo jeediyey dhammaan hay'adihii gacanta ka gaystey soosaaridda dokumantigan, oo ay ka midka yihiin dugsiyada luqadda Ingiriisiga ee Victoria, hay'adaha bixiya AMEP, dugsiyada sare, TAFE-ka iyo jaamacadaha.

Hay'adaha xubnaha ka ah Kooxda Shaqaysa ee Dadka Dhallin-yarada Qaxootiga ah iyo Turjumaadda, oo ay ka mid yihiin Dowladda Dhexe (Commonwealth) ee Australia, loo-shaqeeyeyaal iyo wakiillo, kama masuul aha wixii khasaare ah ee mar kasta ku yimaada ciddii kasta oo ay wax uga yimaadaan adeegsiga macluumaadka ku jira daabacaaddan, ha ahaado mid dayacaad ah ama wax kalee.

© 2003 Xarunta Arrimaha Dhallin-yarada Dhaqannada-badan
(2003 by The Centre for Multicultural Youth Issues)

Centre for Multicultural Youth Issues

Level 1, 308 Drummond Street
CARLTON VIC 3053

Phone: (03) 9349 3466 Fax: (03) 9349 3766
Email: info@cmyi.net.au Website: www.cmyi.net.au

Victorian Settlement Planning Committee, Secretariat

Department of Immigration and Multicultural and Indigenous Affairs
Level 25 Casselden Place, 2 Lonsdale Street
MELBOURNE VIC 3000

Phone: (03) 9235 3357 Fax: (03) 9235 3266
Email: nicholas.chiam@immi.gov.au

Horudhaca.....	5
Nidaamka Waxbarashada & Tababarka ee Victoria.....	6
Qaab-dhismeedka Shahaadooyinka Australia.....	7
<i>Waddooyinka loo maro Waxbarashada & Tababarrada Victoria.....</i>	7
Dugsiyada iyo Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga (English Language Schools and Centres).....	8
<i>Barnaamijka Dadka Dhawaanta Yimid (New Arrivals Program).....</i>	8
<i>Ka-dib barnaamijka Dadka Dhawaanta Yimid.....</i>	8
<i>Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?.....</i>	9
Dugsi-Dhigashada Hoose iyo Sare ee Victoria.....	10
<i>Xaqiiqooyinka ka jira Dugsiyada.....</i>	10
<i>Manhajka.....</i>	10
Shahaada Victoria ee Waxbarashada (Victorian Certificate of Education).....	11
<i>Maxay tahay VCE-du?.....</i>	11
<i>Sidee baa loo Habeeyaa VCE-da?.....</i>	11
<i>VCE VET (Waxbarashada iyo Tababarka Mihnadaha - Vocational Education and Training).....</i>	11
<i>Ingiriisiga Luqad Labaad Ahaan (ESL).....</i>	12
<i>Sidee VCE-da loo Qiimeeyaa?.....</i>	12
<i>Dhibcaha Qiyaasta Galitaanka Jaamacadaha Qaranka ee Isku-dhigma (Equivalent National Tertiary Entrance Rank - ENTER).....</i>	13
<i>Ardayda waxbarashada ku laabanaysa (ardayda waaweyn).....</i>	13
<i>Ma ku soo dhammaystay dugsigaagii sare waddan kale?.....</i>	13
<i>Isla-qaadashada maaddooyinka Jaamacadda iyo VCE-daada.....</i>	13
<i>Sidee Baad ku heli kartaa Macluumaad dheeraad ah?.....</i>	13
Shahaada Victoria ee Aqoonta La-Dabaqay (Victorian Certificate of Applied Learning - VCAL).....	15
<i>Maxay tahay VCAL?.....</i>	15
<i>Yaa Samayn kara VCAL?.....</i>	15
<i>Shuruudaha Galitaanka.....</i>	15
<i>Immisay qaadanaysaa in la dhammaysto VCAL?.....</i>	15
<i>Halkee baan ku samayn karaa VCAL?.....</i>	15
<i>Maxay yihiin noocyada maaddooyinka lagu qaato VCAL?.....</i>	16
<i>Sidee VCAL Loo Qiimeeyaa?.....</i>	16
<i>Maxaa ka mid ah waxyaalaha lagu tixgasho VCAL?.....</i>	16
<i>Waqti-dhimman ma shaqayn kartaa amase ma wadi kartaa Shaqo-barasho adoo ku qoran VCAL?.....</i>	17
<i>Maxaad helaysaa ka-dib dhammaystirka VCAL?.....</i>	17
<i>Halkee la aadi ka-dib dhammaystirka VCAL?.....</i>	17
<i>Sidee Baad ku heli kartaa Macluumaad dheeraad ah?.....</i>	17
Fasallada Luqadda Ingiriisiga ee AMEP (AMEP English Language Classes)...	18

<i>Yaa dhigan kara?</i>	18
<i>Siyaabaha aad Ingiriisiga uga baran karto MEP</i>	18
<i>Ka-qaybgalayaasha AMEP waxay kaloo heli karaan</i>	18
<i>Fasallada iyo waddooyinka Ingiriisiga ee dheeraadka ah</i>	18
<i>Sidee Baad ku heli kartaa Macluumaad dheeraad ah?</i>	19
<i>Barnaamijka Barashada Luqadda, Akhris-Qoraalka iyo Xisaabinta (Language, Literacy and Numeracy Programme - LLNP)</i>	19
Farsamada iyo Waxbarashada Dheeraadka ah (Technical and Further Education - TAFE)	21
<i>Shahaadooyinka</i>	21
<i>Daraasadaha Luqadda Ingiriisiga</i>	22
<i>Galitaanka Mac-hadyada TAFE-ka</i>	22
<i>Waddooyinka TAFE-ka ilaa Jaamacadda</i>	23
<i>Kharashka Fasallada</i>	23
<i>Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?</i>	23
Jaamacadaha (Universities)	24
<i>Shuruudaha ugu Yar ee galitaanka</i>	24
<i>Qaanuunka Galitaanka ee Gaarka ah (Special Entry Provisions)</i>	24
<i>Shuruudaha koorsooyinka ee ardayda soo dhammaystay VCE-da</i>	25
<i>Sidee loo codsadaa galitaanka koorsooyinka jaamacadaha Victoria</i>	25
<i>Mashruuca Deeqda Waxbarashada Sare (Higher Education Contribution Scheme- HECS)</i>	25
<i>Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?</i>	25
Taageero Dhaqaale	27
<i>Gunnada Dhallin-yarada (Youth Allowance)</i>	27
<i>Lacagaha Austudy (Austudy Payment)</i>	27
<i>Gunnada Gaarka ah</i>	27
<i>Qiimaynta Dhakhliga iyo Hantida</i>	27
<i>Deganaanshaha</i>	28
<i>Gunnooyin Dheeraad ah</i>	28
<i>Adeegyada Centrelink ee Dhallin-yarada</i>	29
<i>Waajibaadka qofka ee Centrelink</i>	29
Ilaha macluumaad dheeraad ah (Sources of Further Information)	30
<i>Tixraacyada Guud</i>	30
<i>Macluumaadka VCE-da ee guud (For VCE Information in general)</i>	30
<i>Macluumaadyada la xirriira waxbarashada aqoon-dirsadka</i>	30
<i>Macluumaadka waxbarashada Guud oo loogu talo-galay waalidiinta</i>	30
<i>Macluumaadka la xirriira TAFE-ka</i>	30
<i>Macluumaadka ku saabsan shaqada, TAFE-ka iyo Jaamacadda</i>	31

Horudhaca

Buuggan-yar waxaa loogu talo-galay inuu kaafiyo baahida macluumaad ee dadka dhallin-yarada ah ee qaxootiga iyo soo-galootiga cusub ee dhawaanta yimid kuwaas oo doonaya inay mustaqbalka ka sii wataan waxbarashadooda iyo tababarkooda Australia.

Buuggan-yar waxaa loo soo saaray ayadoo laga jawaabayo baahida la dareemay ee haysa dadka dhallin-yarada ah ee qaxootiga iyo soo-galootiga cusub ee dhawaanta yimid, iyo dadka la shaqeyaya ayaga, asagoo buuggu ah horudhac iyo dulmar nidaamka waxbarashada iyo tababarka ee Victoria. Ahmiyad ayaa la siiyey ah ayadoo ay jiraan ikhtiyaarro noocyo waxbarasho iyo tababarro aad u ballaaran, haddana ay jirto helitaan la'aan macluumaad (xog) iyo taageero ka caawisa dadkaas inay fashaan dariiqyo cad cad oo ku-talo-gal ah inta ay ku jiraan koorsooyinka dhexdooda.

Waddooyinka (Pathways) waa erayga loo adeegsadey in lagu sifeeyo tallaabooyin taxane ah oo la maro inta lagu jiro nidaamka waxbarashada iyo tababarrada. Tallaabooyinkan waxay yihiin doorashooyinka lagu sameeyo hadba koorsada la baranayo. Waddada sida taxadar ku jiro loo qorsheeyey waxay aqoonsataa qorshooyinka xirfadeed iyo hiwaayadeed ee qofka, waxay garowsataa heerka luqadeed ee uu hadda marayo/marayso iyo baahida luqadeed, waxayna isku daydaa inay kuwaas la eegato ikhtiyaarrada waxbarasho iyo tababareed oo shuruudahaas kafaynaya.

Tallaabada kowaad, dad badan oo dhallin-yaro ah oo ay hayaan baahiyo luqadda Ingiriisiga ah ayaa isku qora Barnaamijka Ingiriisiga ee Dadka dhawaanta Yimid (On-Arrival English Program). Tanina sida badan, waxay ka dhacdaa dugsiyada ama xaruumaha Luqadda Ingiriisiga, haddii da'du ardaygu tahay ilaa 18 sano, amase waxay ka dhacdaa Barnaamijka Ingiriisiga ee Dadka Waaweyn (Adult Migrant English Program - AMEP), haddii da'da ardaygu ka weyn tahay 18 sannadood.


Ka-dib markii la dhammeeyo Barnaamijka Ingiriisiga ee Dadka Dhawaanta Yimid, dadka jecel inay sii wataan waxbarasho ama tababar waxaa ka horyimaada go'aannada ah halkee bay ka heli karaan koorsada ugu habboon. Buuggan-yar waxay ujeeddadiisu tahay inuu bixiyo macluumaadka dadka u suurta-galinaya inay sameeyaan doorashooyin wargashan ee mustaqbalkooda.

Waddadaasi waxay u horseedi kartaa laga soo bilaabo koorsada Ingiriisiga ee Dadka Dhawaanta Yimid ilaa isu-gaynta tababarrada xirfadaha ee luqadda Ingiriisiga iyo mihnadaha, amase shaqo gaar ah, oo lagu helo shaqo. Waddo kale waxay u horseedi kartaa laga soo bilaabo koorsada Ingiriisiga ee Dadka Dhawaanta Yimid ilaa dugsiya sare, ama waxbarashada dheeraadka ah.

Waxaa muhiim ah in la aqoonsado in waddooyinka hore ee loo marayey nidaamkii dugsiya ee khasabka ahaa ilaa la gaaro jaamcad *aysan ahayn waddada kaliya* ee lagu gaaro aqoon xirfadeed amase mihnad guul leh. Dad badan oo dhallin-yaro ah oo dhawaanta yimid waxay u baahan yihiin waqti dheeraad ah iyo taageero si ay u gaaraan heer fiican ee xirfadaha Ingiriisiga ee aqooneed, in la tuso nidaamka waxbarashada ee Australia iyo in loo soo kabo waxbarashadii uga luntay waddamaddoodii hooyo. Sidaas darteed waxaa jira waddooyin badan oo loogu talo-galay inay arrimahaas wax ka qabtaan. Xaalladdan oo kale, waxa mar kasta waxtar leh in loo lahaado caqli furan waddooyinka kale ee macquulka ah kuwaas oo si fiican loogu talo-galay dadka dhallin-yarada ah ee soo-galootiga ama qaxootiga ah, iyo in layska ilaaliyo niyad jabka dadaalka inta lagu jiro waddooyinka caadiga ah ee aan habboonayn.

Waddooyinka kala duwan waxay ku kala habboon yihiin dadka kala duwan, tallaabada kowaad ee muhiimka ahina waxay tahay inaad naftaada ku hubayso macluumaadka ku habboon. Waxaan rajaynaynaa in buuggan-yari ku siin doono fursad aad ku bilaabi karto bilow fiican ee waddada waxbarashadaada iyo tababarkaaga Australia.

Nidaamka Waxbarashada & Tababarka ee Victoria



Qaab-dhismeedka Shahaadooyinka Australia

Waddooyinka loo maro Waxbarashada & Tababarrada Victoria

Dugsiyada Sare

- Sanooyinka (10), 11 & 12 Shahaadada Victoria ee Waxbarashada (Victorian Certificate of Education - **VCE**) (waxaa ka mid ah daraasadaha **VET**) ama
- Shahaadada Victoria ee Aqoonta La-Dabaqay (Victorian Certificate of Applied Learning - **VCAL**) ama
- Digriiga Caalamiga ah (**International Baccalaureate - IB**)

Waxbarashada Mih-nadeed & Tababareed (TAFE & Bixiyeyaalka kale ee diiwaan-gashan)

- Shahaadada Iaad
- Shahaadada Ilaad (La mid Tababarka)

- Shahaadada IIIaad (Shahaado Sare ama Diblomada La-xirriirta)

- Dibloomada
- Dibloomada Sare

- Digriiga Bajaloorka

Wabarashada Sare (Jaamacadaha)

- Dibloomada
- Dibloomada Sare

- Digriiga Bajaloorka
- Shahaadada
- Graduate-ka
- Graduate Diblooma
- Digriiga Masters-ka
- Digriiga Doktoraytka

Dugsiyada iyo Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga (English Language Schools and Centres)

Barnaamijka Dadka Dhawaanta Yimid (New Arrivals Program)

Ardayda dhawaanta timid oo xaqa-u-leh maaddada **Ingiriisiga Luqad Labaad ahaan (English as a Second Language - ESL)** waxay gali karaan fasallada ESL-ka ee dugsiyada dowladda ayagoo ka faa'adaysanaya Barnaamijka Dadka Dhawaanta Yimid. Barnaamijkan waxaa sida badan lagu bixiyaa **Dugsiyada Luqadda Ingiriisiga Hoose iyo kuwa Sare iyo Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga (Primary and Secondary English Language Schools and English Language centre - ESL/Cs)**, iyo Barnaamijyada Luqadda Ingiriisiga ee Geelong iyo Shepparton.

Barnaamijyada Dugsiyada/Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga waxaa la siiyaa ardayda haysata deganaanshaha joogtada ah kuwaas oo Australia joogey wax ka yar lix bilood, kuwaas oo ay u qorshaysan tahay inay galaan dugsiyada hoose ama sare ka-dib marka ay dhammeeyaan koorsada Ingiriisiga ah. Ardayda haysata fiisooyinka ku-meel-gaarka ah ayaguna way gali karaan barnaamijkan haddii boosas ka bannaan yihiin. Ardayda ka weyn 18 sano, marka la joogo Janaayo 1 deeda sannadka uu dugsi isku qorayo, uma aysan xaq laha inay barnaamijkan isku qoraan waana laga talinayaa barnaamijka ku habboon ayaga, kaas oo ay ka mid yihiin **Barnaamijka Ingiriisiga Dadka Waaweyn ee Soo-galootiga ah (Adult Migrant English Program - AMEP)** ama koorsada TAFE-ka.

Badiba ardaydu waxay dhigtaan ilaa labo teeram (lix bilood). Ardayda kale ee ku timid asalka barnaamijyada Insaaniga ama qaxootiga ah, kuwaasoo la soo kulmay khalal ku dhacay dugsi-dhigashadoodii hore, waxay ku sii jiri karaan ilaa hal sano.

Dugsiyada/Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga waxay bixiyaan barnaamijyada luqadda Ingiriisiga oo degdeg ah halkaas oo ay ardaydu ku bartaan maaddooyinka lagu qaato manhajka dugsiyada caadiga ah. Barnaamijyadu waxay u jiraan inay ardayda u diyaariyaan baahida luqadda Ingiriisiga ee laga doonayo dugsiyada caadiga ah iyo inay barto dugsi-dhigashada Australia. Kalkaaliyeyaasha Waxbarashada Dhaqannada-Badan (MEAs) ayaa la shaqaalaysiiyaa si ay ardayda uga caawiyaan oo ka taageeraan siday u yeelan lahaayeen xirriir adag oo u dhaxeeya qoysaska iyo dugsiyada.

Ardaydu waxay si toos ah isugu qori karaan Dugsiyada/Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga ama dugsi ama hay'ad ayaa soo diri karta. Su'aalaha la xirriira dugsi-ku-qoridda waxaa la weydiin karaa Dugsiyada/Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga ee ugu dhow halka uu ardaygu ku nool yahay. Ardayda haysata deganaanshaha joogtada ah, oo ku qoran Dugsiyada/Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga, waxa xaq-u-leeyihiin tikidhada baabuurta lagu raaco oo lacag la'aanta ah.

Ka-dib barnaamijka Dadka Dhawaanta Yimid

Dugsiyada/Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga waxay u diraan ardayda dugsiyada ku habboon marka ay u dhammaato koorsada la siiyo Dadka dhawaanta Yimid.

Ardayda ESL-ka oo badan ayaa isku qora dugsi sare ee caadiga ah ka-dib dugsiyada iyo Xaruumaha Luqadda Ingiriisiga halkaas oo ay ka taageerto luqadda Ingiriisiga ee ESL-ka, gaar ahaan dugsiyada ay dhigtaan arday badan ee ESL-ka. Ardaydan waxaa badanaa lagu taageeraa sannadaha VCE-da si loogu diyaariyo waxbarasho dheeraad ah.

Ardayda qaarkeed, oo ay ka mid yihiin kuwa Australia yimid ayagoo aan wax dugsi ah ku soo dhigan waddankoodii, waxay ka bixi karaan nidaamka dugsi si ay shaqo u raadsadaan, ama barnaamijyada dhallin-yarada ESL-ka ee ka jira TAFE-ka ama **Guddiga Waxbarashada Dadka Waaweyn (Adult Council of Education)**.

Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?

Web-site-ka Dadka Dhawaanta Yimid ee **Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka (The Department of Education and Training - DE&T)** wuxuu ku yaalla faahfaahinta liiska lagala xirriiri karo Dugsiyada/Xaruumaha Luqadda Ingriisiga ee Victoria oo laga heli karo:

<http://www.sofweb.vic.edu.au/lem/esl/enev.htm>

Ama ka wac: (03) 9637 2131, Fax: (03) 9637 2050.

Dugsi-Dhigashada Hoose iyo Sare ee Victoria

Xaqiiqooyinka ka jira Dugsiyada

Victoria dugsi-dhigashadu waa ku khasab carruurta oo dhan laga bilaabo da'da lixda ilaa shan-iyotabanka. Ardaydu waxay dhigan karaan dugsiga isugeyn saddex-iyotoban sano, ayagoo dhiganaya toddobo sannadood dugsiga hoose (sannadka bareebka ilaa sannadka 6aad) iyo lix sano oo dugsiga sare ah (Sannadka 7aad ilaa sannadka 12aad).

Victoria waxaa jira noocyo dugsiyo ah oo la dhigto: dugsiyada isku-jirka ah, kuwa hal jinsi dhigto, kuwa diiniga ah, kuwa gaarka ah iyo kuwa dowladda.

Sannad-dugsiyeed kastaa wuxuu ka bilaabmaa Jannaayo wuxuuna dhammadaa December. Sannad kastaa wuxuu ka kooban yahay afar teeram, oo ay ku jiraan fasaxyo ilaa labo asbuuc ah oo u dhaxeeya teeramyada. Ma jiro wax fasax ah oo u dhaxeeya xilliga December – Jannaayo. Saacadaha dugsigu waxay badanaa u dhaxeeyaan 9:00am ilaa 3:30pm, Isniinta ilaa Jimcaha.

Manhajka

Dugsiyada oo dhan waxay ardayda siiyaan manhaj guud oo loogu talo-galay inuu ardayda u diyaariyo xirfadahooda mustaqbaleed. Manhajku wuxuu ardayda siiyaa kala doorasho ballaaran ee maaddooyinka ku habboon baahiyaha iyo kartiyaha wax-barashadooda gaar ahaaneed ee ka jirta **Maaddooyinka Wax-barashada ee Furaha ah:**

- Farshaxanka
- Ingiriisiga/Ingiriisiga Luqad Labaad ahaan
- Waxbarashada Caafimaadka iyo Jir-dhiska
- Luqadaha Kale ee Aan Ingiriisiga Ahayn (LOTE)
- Xisaabta
- Sayniska
- Daraasadaha Bulshada iyo Bey'adda
- Tiknoloojiyadda

Dugsiyada oo dhan waxay bixiyaan Maaddooyinka Wax-barashada ee Furaha ah, hase ahaatee kuwa badan ayaa bixiya maaddooyin badan oo isla maadda kasta ka mid ah. Dugsiyadu waxay ardayda u diyaariyaan waddada xirfadda ay jecel yihiin inay bartaan. Dugsiyada sare, barayaasha xirfadaha waxay ardayda ku caawiyaan inay u tilmaamaan kala doorashadooda xirfadaha. Xirriyeyaasha daryeelka ardayda waxay ardayda ka siiyaan talooyin iyo la-talin arrimaha daryeelka si ay ardayda uga caawiyaan inay sii wadaan inay horumar fiican ka gaaraan dugsiga.

Shahaada Victoria ee Waxbarashada (Victorian Certificate of Education)

(Ogow: Macluumaadka qaarkiis wuu is-baddeli karaa Dugsiyada iyo bixiyeyaasha kale ayaa haya hadba macluumaadka ugu dambeeya oo ku saabsan VCE-da waxaad kaloo ka eegi kartaa web-siteka Hay'adda Manhajka iyo Qiimaynta Victoria (Victorian Curriculum and Assessment Authority - VCAA) oo ah: <http://www.vcaa.vic.edu.au>)

Maxay tahay VCE-du?

Marka ardayda iyo barayaashu ka hadlayaan VCE, waxay ujeedaan Shahaadada Victoria ee Waxbarashada. VCE-du waxay muujinaysaa in ardaydu si fiican u dhammaysteen sanooyinkii ugu dambeeyey ee dugsi-dhigashadooda dugsiga sare.

Waxbarashada VCE-da waxay badanaa qaadataa ilaa labo sano, hase ahaatee way ka sii badnaan kartaa. Ardayda ESL-ka qaarkeed waxay sahlanaan bidaan inay daraasadaha VCE-da ay ku qaataan ilaa saddex sano si ay waqti ugu helaan in Ingiriisigooda kor-u-qaadaan. Dugsiyadu waxay ardayda kula talin karaan marka ay sidaas habboon tahay.

Sidee baa loo Habeeyaa VCE-da?

Daraasadaha

Ardaydu waxay badanaa bartaan heerka VCE-da shan ama lix maaddo sannad kasta. Maaddooyinkan waxaa loo yaqaan Daraasadaha.

Cutubyada

Badiba daraasadaha VCE-da waxay ka kooban yihiin afar cutub. Halkii samistarba (sannadka barkiis) waxaa lagu qaataa hal cutub. Cutubyada 1aad iyo 2aad sida caadiga ah waxaa lagu qaataa Sannadkaa 1aad waxaana loo baran karaa sidii cutub kaliya. Cutubyada 3aad iyo 4aad ayagana waxaa sida badan lagu qaataa Sannadka 12aad waana in si isku xigta loo qaataa. Ardaydu uma baahna inay wada dhameeyaan cutubyada daraasadaha oo dhan sidii ayadoo qayb ka ah koorsada VCE-da, hase ahaatee waa inay ku helaan buundooyinka 'S' (Si Fiican) ugu yaraan lix-iyo-toban cutub ka-hor intaan la siin shahaadada VCE-da.

Daraasadaha iyo cutubyada khasabka ah

Ardaydu marka ay kala doortaan daraasadaha iyo cutubyada koorsada VCE-da, waxaa jira shuruudaha qaarkood oo laga doonayo in koorsadii kastaaba laga helo. Barayaasha ayaa ardayda u tilmaami doona sidii ay u kala dooran lahaayeen daraasadaha iyo cutubyada si loo helo shuruudahaas.

Markii ay doortaan daraasadahooda, ardaydu waa inay ka tashadaan qorshahooda waxbarasho iyo shaqo mustaqbalka. Koorsooyinka jaamacadda oo badan waxay leeyihiin shuruudo galitaan oo sheegaya daraasado gaar ah oo ay ahayd in si fiican loogu soo qaatay ayagoo qayb ka ah VCE-da. Haddii ardaygu doonayo inuu barto koorso mihnadeed ama tababareed waa in siddeed ka mid ah lix-iyo-tobanka cutub ay noqdaan **Cutubyada Mihnadeed iyo Tababarka Waxbarasho (VET)**.

VCE VET (Waxbarashada iyo Tababarka Mihnadaha - Vocational Education and Training)

Ardaydu waxay barnaamijka VCE-da ku qaadan karaan aqoonsiga shahaadada waxbarashada mihnadaha iyo tababarka (VET). Qorshahan waxaa loo yaqaan VCE VET.

Barnaamijka VCE VET wuxuu awoodsiiyaa dugsiyada, machadyada tababarka iyo farsamooyinka inay wadajir u shaqeeyaan si ay ardayda ugu diyaariyaan shaqo iyo tababar dheeraad ah. Badiba dugsiyada sare waxay bixiyaan koorsada VET oo gacan ka gaysata dhammaystirka fiican ee shuruudaha VCE-da, koorsooyinkaasna qaran ahaan ayaa loo aqoonsan yahay. Waxaa jira 40 qaybaha farsamada VET oo laga heli karo in lagu barto VCE-da, kuwa badan ayaana helidoodu soo kordhaysaa mar kasta.

Cutubyada VCE VET waxay qaab-dhismeedka VCE-da kaga jiraan Cutubyada 1-4. Ardayda si fiican u dhammaysata barnaamijka VCE VET waxay helaan aqoonsi qaraneed ay aqoonsan tahay **Qaab-dhismeedka Tababarka Qaraneed (National Training Framework)**. Badiba maaddooyinka VCE VET waxay kaloo qayb ka noqdaan dhibcaha daraasadda ee ardayga haddii lagu qaato heerka Cutubyada 3aad-4aad. Dhibcahani waxay qayb ka noqonayaan **Dhibcaha Qiyaasta Galitaanka Jaamacadaha Qaranka ee Isku-dhigma (Equivalent National Tertiary Entrance Rank - ENTER)**.

Barnaamijyada VCE VET badanaa waxay yihiin heerka Shahaadada 2aad ama 3aad. Haddii ardaydu si fiican u dhammaysato aqoonsiga VET oo ka mid ah VCE-dooda (heerka Shahaadada 2aad ama 3aad) waxay si toos u gali karaan koorso heer sare ah ee TAFE-ka (T.a: Shahaadada 4aad). Ardaydu waxay kaloo barnaamijka VCE-da ku qaadan karaan Shaqo-Barasho waqti-dhimman ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xirriir Xirriiriyaha VCE-da iyo Baraha Xirfadaha ee dugsiya sare ee kuugu dhow.

Ingiriisiga Luqad Labaad Ahaan (ESL)

Ardayda ESL-ku badanaa waxay u doortaan **Ingiriisiga/ESL-ka** daraasadda Ingiriisiga ee khasabka ah. Ardaygu wuxuu xaq u yeelanayaa aqoonsiga ESL-ka haddii labadan shuruudood oo soo socda la helo:

- Ardaygu ama ardayadu uu deganaa Australia waxaan ka badnayn toddobo sano oo kaalandar ah isla markii laga gaaro 1da Jannaayo ee sannadka daraasadda lagu qaadanayo cutubyada 3aad iyo 4aad; iyo in
- Ingiriisigu u ahaa ardayga luqadda wax lagu barto ee ugu weyn muddo aan ka badanayn toddobo sano oo ka horraysa sannadka daraasadda lagu qaadanayo cutubyada 3aad iyo 4aad

Duruufaha gaar ahaaneed qaarkood, ardayga aan helin labada shuruudood ee kor lagu soo sheegay waxaa la siin karaa xaq-u-yeelashada ESL-Ka. Kala xirriir dugsiya wixii macluumaad dheeraad ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xirriir VCAA taleefoonka 9651 4300 ama ka eeg website-ka ah: <http://www.vcaa.vic.edu.au>

Sidee VCE-da loo Qiimeeyaa?

Waxaa jira laba qaybood ee qiimaynta VCE-da: qiimaynta dugsiya ku salaysan iyo imtixaanno dibadeed. Ardayda aqoon jirey in qiimaynta oo dhan ku salaysnayd imtixaanno la qaado dhammaadka sannadka waxay ogaanayaan in daraasaddaas VCE-da ah ay ka duwan tahay siday yaqaaneen. Shaqada ardayda waxaa la soo qiimeeyaa sannadka oo dhan ardayduna waa inay soo dhammaystiraan shaqooyin kala duwan iyo sidoo kale imtixaanno dugsiya dibbadda ka ah. Taas macnaheedu waxay tahay inay si aad ah ay ugu diyaarsan yihiin shaqadaas si joogta ah inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka oo dhan.

Ardayda baranaysa maaddada cutubyada 3aad iyo 4aad waxay galayaan imtixaanno dugsiya dibbadda ka ah iyo waliba shaqada koorsada laga doonayo. Shaqooyinka imtixaanka dibadeed waxaa lagu bixiyaa buundooyinka A+ ilaa E. Badiba imtixaannadu waxaa la qaadaa dhammaadka sannadka, hase ahaatee daraasadaha qaarkood waxay leeyihiin imtixaanno la qaado sannadka bartamihiiisa iyo sannadka dhammaadkiisa.

Dhibcaha Qiyaasta Galitaanka Jaamacadaha Qaranka ee Isku-dhigma (Equivalent National Tertiary Entrance Rank - ENTER)

Markii ay dhammaato qiimaynta VCE-da oo dhan, dhibcaha ENTER ayaa laga xisaabiyaa natiijoyinka ardaygii kasta. Dhibcahan waxaa loo adeegsadaa sidii laysugu qori lahaa boosaska jaamacadaha.

Ardayda waxbarashada ku laabanaysa (ardayda waaweyn)

Ardayda ku laabanaysa daraasadda waa inay jiraan ugu yaraan da'da 18 sano 1da Jannaayo ee sannadka ay doonayaan inay dhammaystaan VCE-dooda.

Si ay ugu xaq yeeshaan VCE-da, waa inay si fiican u soo dhammaystaan ugu yaraan:

- laba cutub oo Ingiriisiga ah
- Saddex cutubyada 3aad iyo 4aad oo isku xiga oo ah daraasadaha aan Ingiriisiga ahayn, oo laba ka mid ahi tahay VCE VET isku xiga.

Qaar ka mid ah ardayda waaweyn waxay doortaan inay bartaan cutubyo dheeraad ah si ay kor ugu qaadaan fursadaha waxbarasho dheeraad ah.

VCE-da Dadka Waaweyn waxaa badanaa lagu qaataa koleejooyinka TAFE-ka, dugsiyada sare ama waxbarashada aqoon-dirsadka.

Ma ku soo dhammaysatay dugsiagaagii sare waddan kale?

Ardayda qaarkeed, hore ayey waddan kale ugu soo qaateen daraasado u dhigma Sannadka 12aad ama ka sareba. Ardaydani waxay codsi u qoran karaan VCAA si loogu aqoonsado wax u dhigma daraasaddii ay ku soo dhammaysteen meelo kale.

Macluumaad dheeraad oo la xirriira buundooyinka tixgelinta (credit) ee daraasadaha VCE-da iyo caddaymaha u-dhigma waxaa laga heli karaa **Diiwaannada Ardayda iyo Natiijada Cutubyada (Students Records and Results Unit)** ee VCAA adoo ka waca taleefoonka (03) 9651 4402. Haddii ardaydu u malaynayaan inay xaq u leeyihiin caddaymaha u dhignaanta, waa inay dugsigooda ka codsadaan inuu codsi u sameeyo ayaga.

Isla-qaadashada maaddooyinka Jaamacadda iyo VCE-daada

Ardayda qaarkeed oo si gaar ah loo doortay waxay awoodi karaan inay maaddada jaamacadda ee sannadka kowaad inay ku darsadaan daraasadaha VCE-dooda ayadoo la ballaarinayo barnaamijka daraasadaha. Daraasadaha la ballaarinayo waxaa lagu kordhinayaa daraasadaha VCE-da ayadoo la gaarsiinayo heerka jaamacadda ee sannadka kowaad waxaana laga heli karaa maaddooyin badan oo lagu qaato toddoba jaamcaddood. Maaddooyinkan jaamacadda waxaa lagu darsadaa barnaamijka VCE-da ee buuxa sidaas darteed waxaa dugsiyadu siiyaan ardayda aqoontoodu aadka u dhisan tahay.

Sidee Baad ku heli kartaa Macluumaad dheeraad ah?

Sannad kasta VCAA waxay soo saartaa buug Tilmaame VCE-da oo

Laga helo: <http://www.vcaa.vic.edu.au/vce/guide02/index.htm> kaas oo la siiyo ardayda Sannadka 10aad. Tilmaamahan waxaa ku yaalla macluumaadkii ugu dambeeyey ee VCE-da iyo is-baddellada sannadka soo socda. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xirriir Sarkaalka Macluumaadka ee VCAA adoo ka wacaya taleefoonka ah 9651 4544 ama 9651 4328 (Dadka Melbourne ka soo wacaya) ama 1800 134 197 (Dadka Tuulooyinka ka soo wacaya).

Macluumaadka VCE-da ee kore waxaa laga soo qaatay macluumaadka ku yaalla website-ka ESL-ka ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka: <http://www.sofweb.vic.edu.au/lem/esl/index.htm>. Ka eeg website-kan wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan VCE-da kaas oo lagu turjumey 14 luqadood..

Shahaada Victoria ee Aqoonta La-Dabaqay (Victorian Certificate of Applied Learning - VCAL)

(Waxaa lagu soo saaray ogolaanshaha Hay'adda Manhajka Victoria iyo Qiimaynta, VCAA.)

Maxay tahay VCAL?

Shahaadada Victoria ee Aqoonta La Dabaqay (VCAL) waa shahaado dugsiga sare oo cusub taas oo ku salaysan aqoonta la dabaqay. 'Wax-barashada La-dabaqay' macnaheedu waxay tahay in koorsada tahay farsamo gacanta ah waxayna ujeeddadu tahay inay kor-u-qaaddo xirfadaha, kuwaas oo kugu caawin kara inaad u diyaar-garowdo waxbarasho dheeraad ah, tababar iyo shaqo.

VCAL waxay leedahay saddex heer – **Heerka Asaaska, Heerka Dhexe iyo Kan Sare**. Heerka sare waa heerka ugu sarreeya. Waxaad ka bilaabi kartaa heerka ku habboon baahidaada iyo kartidaada. Tusaale ahaan, haddii aad bilowdo heerka dhexe oo aad si fiican u dhammayso, waxaad u wareegi kartaa heerka sare ee Sannadka 12aad. Heerkii kastaaba wuxuu sida caadiga ah qaataa barnaamijka sannadka lagu dhammaystiro.

Yaa Samayn kara VCAL?

VCAL waxaa loogu talo-galay inay daboosho baahida ardayda Sannadaha 11aad iyo 12aad kuwaas oo u baahan koorso ku salaysan waayo-aragnimada camaliga ah. Waxaa kaloo heli kara ardayda kale; tusaale ahaan, kuwa wax ka barta machadyada TAFE-ka.

Shuruudaha Galitaanka

Wax shuruudo galitaan ah ma jiraan. Ardaydu waxay iskaga qori karaan VCAL heerka ku habboon baahida wax-barashadooda. Barahaagu ama la-taliyaha xirfadaha ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato heerka adiga kuu fiican.

Immisay qaadanaysaa in la dhammaysto VCAL?

Waxaad sida caadiga ah ku qaadan kartaa Shahaadada VCAL marka aad si fiican u dhammaysato barnaamijka wax-barashada sannadka oo dhan oo lagu heshiiyey. Tusaale ahaan, VCAL heerka Dhexe waxaa lagu dhammayn karaa Sannadka 11aad, ayadoo ay la socoto VCAL heerka Sare oo Sannadka 12aad ah.

Halkee baan ku samayn karaa VCAL?

VCAL waxaa bixiya dugsiga sare oo badan iyo machadyada TAFE-ka ee Victoria 2003. Waxaad u baahan tahay inaad waydiiso dugsiga deegaankaaga ama TAFE-ka inay bixiyaan VCAL. Waxaa lagaa doonayaa inaad isku qorto dugsigaaga ama TAFE-ka, hase ahaatee qayb ka mid ah barnaamijka VCAL waxaad ku samayn kartaa meelo kale sida hay'adaha **Waxbarashada Bulshada Dadka Waaweyn (Adult Community Education)** iyo hay'adaha kale ee bulshada-la-shaqeeya iyo loo-shaqeeyeyaasha.

Maxay yihiin noocyada maaddooyinka lagu qaato VCAL?

Ardayda qaadata VCAL waxay la samaysanayaan barnaamij wax-barasho barayaashooda/la-taliyaha xirfadaha ayagoo doorta cutubyo iyo moodallada ee Qaybtii kasta ee VCAL.

Qaybta 1aad – Barashada Akhris-Qoraalka iyo Xisaabinta

Barnaamijka Wax-barashada VCAL-kaaga waxaa ku jiri kara akhris-qoraalka iyo xisaabinta. Kuwaasna waxaa ka mid ah, cutubiyada akhris-qoraalka iyo xisaabinta oo lagu qaato Shahaadada Waxbarashada Guud ee Dadka Waaweyn ama cutubiyada xisaabta iyo Ingiriiska VCE-da, oo ay ku jiraan cutubiyada **Ingiriiska oo Luqad Labaad ahaan ah (English as a Second Language - ESL)**.

Qaybta 2aad – Xirfadaha U-Gaarka ah Farsamada

Barnaamijka Wax-barashada VCAL-kaaga waxaa ku jiri kara cutubiyada u-gaarka ah farsamada oo lagu qaato barnaamijka Waxbarashada Mihnadeed iyo Tababarka (VET) ama kuwa VCE VET.

Qaybta 3aad – Xirfadaha Shaqada La-Xirriirta

Barnaamijka Wax-barashada VCAL-kaaga waxaa ku jiri kara shaqo waqti-dhimman ah, Shaqo-Barasho Cusub, waayo-aragnimo shaqo iyo shaqo ku qorid – iyo waliba cutubiyada iyo moodallada loogu diyaarinyo shaqada sida caafimadka xirfadeed iyo amniga goobta ama waraysiyada shaqada.

Qaybta 4aad – Xirfadaha Horumarinta Qof ahaaneed

Barnaamijka Wax-barashada VCAL-kaaga waxaa ku jiri kara mashruucyo degaaneed iyo kuwa bulshadeed, shaqada iskaaga ah iyo nashaadyada qorshaysan si ay u caawiso isku-kal-soonaanta, koox-u-wada-shaqaynta iyo xirfadaha kale oo muhiimka u ah nololaha iyo shaqada.

Sidee VCAL Loo Qiimeeyaa?

Ardaydu waxay si guul leh u gaari karaan natiijooyinka wax-barasho ee cutubkii kasta ama moodalka barnaamijka VCAL. Uma baahnid inaad hesho buundooyin. Haddii aad samayso VCAL-ka heerka Sare, markaas waxaad isku qori kartaa cutubiyada 3aad iyo 4aad ee VCE-da waxaadna dooran kartaa inaad buundooyin ku hesho iyo dhibcaha daraasadda ee maaddooyinkaas.

Haddii aad si fiican u dhammayso shuruudaha Cutubiyada VCE-da ama Cutubiyada VCE VET, waxaad heli doontaa Warbixinta Natiijooyinka. Haddii aad si fiican u dhammayso VET ama cutubyo iyo moodallo kale oo dheeraad ah waxaad helayaa Warbixinta Gaaritaanka. Kuwaasina waxa liis-garaynayaan cutubiyadii aad sida fiican u soo dhammaystay ayagoo qayb ka ah barnaamijka VCAL-kaaga.

Maxaa ka mid ah waxyaalaha lagu tixgasho VCAL?

Haddii aad bilowday Shahaadada VET, waxbarashadaadaas waxaa laguugu darayaa VCAL. Waa inaad kala hadashaa barahaaga ama la-taliyaha xirfadaha si uu kaaga caawiyo sidii aad u qorshayn lahayd barnaamijkaaga wax-barasho ee VCAL iyo sidaad u soo saari lahayd inta aad daraasad aad ku soo dhammaystay shahaadada.

Haddii aad mar hore soo samaysay maaddada VCE-da, taas waxaa laguugu darayaa VCAL-ka. Waa inaad ka heshaa natiijada ‘S’ (Si Fiican) cutubka VCE-da.

Ku Laabashada VCE-da

Waxaad ku baddalan kartaa VCE haddii aad is-badesho. Cutubkii kasta ee VCE-da oo si fiican loo dhameeyey asagoo ka mid ah VCAL-kaaga waxaa laguugu tirinayaa VCE-da. Diiwaankaaga natiijooyinka VCE-da waa loo wareejinayaa. Cutubiyada kale ee la soo dhammeeyey oo qayb ka ah VCAL waxaa kaloo suurta-gal ah in buundooyinka tixgelinta (credit) ee VCE-da lagu helo – kala hadal barahaaga ama la-taliyaha xirfadaha.

Waqti-dhimman ma shaqayn kartaa amase ma wadi kartaa Shaqo-barasho adoo ku qoran VCAL?

Waxaad ku heli kartaa aqoonsi iyo buundooyinka tixgelinta wixii shaqo waqti-dhimman ah adoo ku qoran VCAL. Qaybaha shaqada qaarkood waxaa ka mid ah:

- Shaqo-barasho iyo Tababarid waqti-dhimman ah
- Shaqo-waqti dhiman ah
- Shaqo ku meelayn
- Waayo-aragnimo shaqo

Maxaad helaysaa ka-dib dhammaystirka VCAL?

Waxaad helaysaa shahaadada VCAL ee heerka Asaasiga, heerka Dhexe ama heerka Sare haddii aad si fiican u dhammaysato barnaamijkaaga wax-barashada ee heerka Asaasiga, Dhexe ama Sare. Waxaad kaloo helaysaa Caddaynta Natijoooyinka, oo ay ku qoran tahay dhammaan cutubyadii VCE, VCE VET iyo VCAL, iyo Caddaynta Dhammaystirka VET ama koorsooyinka waxbarashada dheeraadka ah.

Sida caadiga ah, ardayda doonaysa inay jaamacadda galaan waa inay haystaan dhibcaha ENTER ee loo xisaabiyey, oo ku sallaysan dhibcaha daraasadda VCE-da. Barnaamijyada VCAL looguma talogalin inay u horseedaan dhibcaha ENTER. VCAL waxay ardayda u diraysaa inay galaan koorsooyinka shahaadada TAFE-ka, shaqo-barashada iyo tababaridda, iyo waxbarashada iyo tabbarada dheeraadka ah ee kale.

Haddii aad dhammaysay VCAL aadna jeceshahay inaad gasho waxbarasho sare weydiiso dugsiigaaga wixii talo ah.

Halkee la aadi ka-dib dhammaystirka VCAL?

Markii aad samayso VCAL, waxaad helaysaa waayo-aragnimo dhan ee adduunka shaqada ah, waxaad helaysaa aqoonsi kugu caawiya inaad horumariso aadna ballaaris waddooyinka xagga shaqada, shaqo-barashada/tababaridda, waxbarashada dheeraadka ah iyo tababar ay ka mid yihiin koorsooyinka VET.

VCAL wuxuu kugu caawinayaa inaad horumariso akhris-qoraalka iyo xisaabinta, inaad xirfadaha la xirriira shaqada, xirfadaha farsamooyinka u-gaarka ah iyo inaad horumariso xirfadaha qof ahaaneed iyo kuwa shaqo-helidda.

Sidee Baad ku heli kartaa Macluumaad dheeraad ah?

La hadal dugsiiga ama TAFE-ka degaankaaga ama ka eeg website-ka **Hay'adda Qiimaynta Shahaadooyinka Victoria (Victorian Qualifications Authority)** oo ah: www.vqa.vic.gov.au.

Fasallada Luqadda Ingiriisiga ee AMEP (AMEP English Language Classes)

Tallaabada kowaad ee u furan dadka dhallin-yarada ah ee dhawaanta yimid kuwaas oo ka weyn 18 sano ama u dhaxeeya 16 & 18 oo aan dooran inay galaan dugsiga luqadda oo hoos yimaada **Barnaamijka Ingiriisiga Dadka Waaweyn ee Soo-galootiga ah (Adult Migrant English Program - AMEP)**.

Dadka Soo-galootiga ah kuwaas oo u baahan fasallo luqadda Ingiriisiga ah waxay xaq u leeyihiin 510 saacadood oo waxbarasho luqadda Ingiriisiga ah, amase saacadaha ay ku qaadato inuu gaaro heerka Ingiriisiga lagu shaqayn karo. Xarunta AMEP ee kuugu dhow ayaa talo kaa siin karta heerkaaga. Fasallada waxaa maalgeliya **Wasaaradda Socdaalka iyo Arrimaha Dhaqannada-badan iyo Dadka Asaliga ah (Department of Immigration and Multicultural and indigenous Affairs - DIMIA)** .

Yaa dhigan kara?

Ka-qayb-galayaasha waxay xaq-u-leeyihiin fasallada AMEP haddii shuruudahan laga soo baxo

- Hadday ka weyn yihiin 18 sano ama ka korba, ama
- Haddii ay da'doodu u dhaxayso 16 iyo 18 sano aysana awoodin inay tagaan fasallada Ingiriisiga ee dugsiyada, iyo
- Inay yihiin Soo-galooti kuwaas oo Australia yimid ka gadaal 1dii Luuliyo, 1991dii, ama in
- La siiyey deganaansho joogto ah laga soo bilaabo ilaa iyo 1dii Luuliyo 1991dii; (hadduusan qofku ahayn soo-galooti ama lahayn deganaansho joogto ah – waxaa jira haysteyaal fiisada ku-meel-gaarka ah ee gaar ah); iyo in
- Aysan iticmaalin 510kii saacadood; iyo in
- Aysan lahayn Ingiriisiga lagu shaqayn karo

Siyaabaha aad Ingiriisiga uga baran karto MEP

- Ayadoo la dhigto maalintii, galabtii ama maalmaha Sabtida iyo Axadda
- Waqti buuxa ama waqti dhimman
- Heerarka Fasallada waa kuwii dadka Bilowga ah, hoose ama dhexe ah
- Fasallada Dhallin-yarada

Ka-qayb-galayaasha AMEP waxay kaloo heli karaan

- Dayeelka ilmaha oo lacag la'aan ah inta fasallada lagu jiro
- Tababarka kombiyuutarka
- Kala-talinta xirfadaha oo lacag la'aan ah
- Waayo-aragnimo shaqo
- Macluumaadka dejinta
- Nashaadyada madadaalashada iyo dibad-baxa ee dadka dhallin-yarada ah

Fasallada iyo waddooyinka Ingiriisiga ee dheeraadka ah

Ka-dib marka la dhammaysto 460 saacadaha AMEP ama la gaaro Ingiriis lagu shaqayn karo, ka-qayb-galayaashu waxay AMES ama TAFE-ka ka baran karaan Ingiriisi dheeraad ah iyo Ingiriisiga Sare. Fasallada Ingiriisiga qaarkood waxay noqon kartaa lagama maarmaan in layska diiwaan-geliyo Centrelink.

Sidee Baad ku heli kartaa Macluumaad dheeraad ah?

AMES waxay ku leedahay xaruumaha waxbarashada Ascot Vale, Ballarat, Benalla, Bendigo, Box Hill, Broadmeadows, Bundoora, Chadstone, Cobram, Coburg, Collingwood, Dandenong, City/Flagstaff, Footscray, Frankston, Geelong, Hawthorn, Hoppers Crossing, Kyabram, Lalor, Maryborough, Mildura, Mt Waverley, Newborough, Noble Park, Oakleigh, Preston, St Albans, Sale, Shepparton, Springvale, Wangaratta, Warragul, Werribee iyo Wodonga
Taleefoonka: 9926 4717 ama ka eeg: www.ames.net.au

Macluumaadka **Koleejooyinka TAFE-ka** waxaa laga helaa TAFE-ka: 131823 ama ka eeg: www.ette.vic.edu.au

Barnaamijka Barashada Luqadda, Akhris-Qoraalka iyo Xisaabinta (Language, Literacy and Numeracy Programme - LLNP)

Wasaaradda Dowladda Dhexe (Commonwealth) ee Waxbarashada, Sayniska iyo Tababarka waxay siisaa tababar luqadda Ingiriisiga oo lacag la'aan ah **Barnaamijka Luqadda, Akhris-Qoraalka iyo Xisaabinta (LLNP)**, dadka dhallin-yarada ah kuwaas oo u soo haajirey Australia oo dhammaysatay tababarkoodii AMEP hase ahaatee wali u baahan caawimaad dheeraad ah.

Tababarka waxaa la siiyaa kooxo yar-yar inta u dhaxaysa 6 iyo 20 saacadood asbuuciiba ilaa hal sano, ayadoo hadba ku xiran baahida iyo helitaanka ardayda.

Centrelink ayaa qiimaysa xaq-u-yeelashada barnaamijka LLNP iyo qof kasta oo jecel inuu ka qaybgalo waa inuu Centrelink uga diiwaangashan yahay sidii shaqo-raadshe.

Tababarka luqadda Ingiriisiga ee asaasiga ah:

- Shaqo-raadsheyaasha da'doodu tahay 15 ilaa 20, ha qaateen taageero dhaqaale amase yay qaadane,
- Shaqo-raadsheyaasha da'doodu tahay 21 iyo ka koreba kuwaas oo qaata Gunnada Dhallin-yarada, Gunnada Newstart ama Lacagta Waalidiinta la siiyo.

Shaqo-raadsheyaasha kuwaas oo aan qaadn gunnooyinka sare midna waxay Tababarka Luqadda Ingiriisiga Asaasiga ah ka heli karaan haddii ay haystaan qaybaha fiisoyinka ku-meel-gaarka ama joogtada ee 309, 310, 445, 450, 820, 826, 850, 437, 781, 783, iyo 784. Dadka soo-galootiga ah oo ku xiran muddada sugidda ee labada sano si ay u helaan lacagaha damaannadda bulshada ayaguna way soo codsan karaan.

Tababarka luqadda Ingiriisiga Sare ah waxaa heli kara:

- Shaqo-raadsheyaasha kuwaas oo ah muwaadiniin, deganaansho joogta ah leh ama haystayaasha qaybaha fiisoyinka ku-meel-gaarka ah ama joogtada ah ee 309, 310, 445, 450, 820, 826, 850, 437, 781, 783, iyo 784. Kuwaan uma aysan baahna inay helaan taageero dhaqaale.

Bixiyeyaasha tababarku waxay ku yaalliin meelo in loo socdo oo u dhow xafiisyada Centrelink, waxayna Centrelink u diyaarinaysaa ballanta qiimaynta ee codsada u xaq leh. Aqoon-yahan qiimeeye ah ayaa go'aaminaya waddada ugu habboon oo ah tababarka Asaasiga ah, ama tababarka luqadda Ingiriisiga ee Sare. Bixiyeyaashu waxay isugu jiraan koleejooyinka TAFE-ka ilaa bixiyeyaasha bulshada ah waxaana ka mid ah Hay'adaha Tababaradda ee Diiwaan-gashan.

Ardayda ku nool meelaha tuulooyinka ama meelaha fog-fog, ama kuwa ay ku adag tahay inay fasallada tagaan waxay uga faa'idaysan karaan barnaamijka waxbarashada Aqoon-dirsadka. Kanna waxaa kaloo diyaariya Centrelink.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo isku diridda barnaamijka, ka soo eeg xafiiska Centrelink ee deegaankaaga. Macluumaad ku saabsan barnaamijka waxaa kaloo laga heli karaa intarneedka website-ka soo socda oo ah: <https://lnp.dest.gov.au>

Farsamada iyo Waxbarashada Dheeraadka ah (Technical and Further Education - TAFE)

Qaybta Farsamada iyo Waxbarashada Dheeraadka ah (TAFE) waxay waxbarasho iyo tababar ka bixisaa meelo ballaaran oo xiiso leh, oo ku fidsan baaxad weyn oo heerar xirfadeed iyo waxbarasho ah. Badiba kuwaan waxaa lagu bixiyaa machadyada TAFE-ka; halka nidaamka **Waxbarashada Bulshada Dadka Waaweyn (Adult Community Education - ACE)** iyo bixiyeyaalka gaarka ah ay ayaguna bixiyaan barnaamijyo.

Tababarka waxaa ka mid ah:

- Beeraha, Daraasadaha Xayawaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah
- Naqshadaynta Dhismaha, Dhismaha & Qorshaynta
- Sawiridda, Farshaxanka, Muusigga, Qoob-ka-cayaarka & Masraxa
- Ganacsiga, Dhaqaalaha, Maamulka iyo Iibka
- Nidaamyada kombiyuutarka & Macluumaadka
- Waxbarashada
- Handasaha & Taknoolojiyadaha la xirriira iyo Himilaynta
- Caafimaadka, Adeegyada Bulshada iyo Daryeelka
- Soo-Dhawaynta, Dalxiiska, Adeegyada Gaadiidka & Kuwa Qof ahaaneed
- Saynisyada Bani-aadamka iyo kuwa Bulshada
- Sharciga & Amniga
- Sanaacadda & Wax-soo-Saarka
- Sayniska

Heerka waxbarasho iyo xirfadeed looga baahan yahay galitaanka koorisada TAFE-ka wuu is-baddelaa:

- Ardayda Dugsiga hore uga baxaday (kuwa aan dhammaystirin waxbarashada dugsiga sare)
- Dhammaystirka VCE-da/Sannadka 12aad
- Shahaadooyinka Xirfadeed/waayo-aragnimo shaqo hore
- Waxbarashada khalkhalku galay ee ay la kulmeen dadka dhallin-yarada ah ee dhawaanta yimid

Shahaadooyinka

Koorsooyinka TAFE-ka oo dhan waa kuwo la aqoonsan yahay, taas oo macnaheedu yahay waxaa lagu bixiyaa shahaadooyin marka la dhammaysto. Shahaadada TAFE-ka waa shahaado qaran ahaan loo aqoonsan yahay ee **Qaab-dhismeedka Tababarka Qaraneed (National Training Framework)**. Taas macnaheedu waa in shahaadadaas laga aqoonsan yahay Australia oo dhan.

Aqoonsiyadaas shahaadooyinka laga qaato TAFE-ka waxaa ka mid ah:

- Shahaadada I
- Shahaadada II
- Shahaadada III
- Shahaadada IV
- Diblomada
- Diblomada Sare
- Digriiga Bajaloorka

Laga bilaabo 2003, TAFE-ku waxay awoodi doonaan inay codsadaan inay bixiyaan koorsooyin digrii ah oo meelo takhasus gaar ah leh.

Koorsooyinka TAFE-ka waxaa badanaa lagu samayn karaa waqti-buuxa ama waqti-dhimman. Koorsooyinka Shahaadooyinka 1-3 sida badan kama badna 12 bilood oo waqti-buuxa ah. Dibloomada iyo dibloomada Sare waxay sida badan u dhigmaan laba sano waxbarasho waqti-buuxa ah.

Koorsooyinka digriiga ah waxay socdaan muddo saddex ama afar sano ah.

TAFE-ku waxay kaloo bixiyaan tababarka **Shaqo-barasho iyo Tababaridda**. Ka-hor intaan laysku qorin Shaqo-barasho iyo Tababaridda waxaa lagama maarmaan ah in la helo loo-shaqeeye kaas oo isu keenaya heshiiska tababarka iyo tababrka shaqada-korkeeda ah ee daraasaddaada TAFE-ka. Shaqo-barashadu waxay badanaa qaadataa afar sano, tababaridduna waxay qaadataa hal sano.

Daraasadaha Luqadda Ingiriisiga

Machadyada TAFE-ku waxay kaloo bixiyaan barnaamiyada Luqadda Ingiriisiga oo Luqad Labaad ahaan ah (ESL). Barnaamijyadan waxaa loogu talo-galay dadka u baahan Ingiriisiga dheeraadka ah iyo kuwa doonaya inay kor-u-qaadaan fursadhooda waxbarasho dheeraad ah ama shaqaba. Sida badan dadku waxay hore u soo dhammaysteen koorsada laga qaato Adeegyada Waxbarashada Dhaqannada-badan ee Dadka Waaweyn (AMES) ama Xarunta Luqadda.

Dadka haysta deganaanshaha ku-meel-gaarka ah waxay xaq-u-yeelan karaan inay isku qoraan koorsooyinka ESL-ka TAFE-ka.

TAFE-ku waxay leedahay taariikhda bixinta barnaamijyada takhasuska gaarka ah ee dadka Dhallin-yarada ee dhawaanta ayimid kuwaas oo jecel inay kula bartaan Ingiriiska beey'ad saaxiibtinimo oo taageero leh dadka dhallin-yarada ah ee kale. Barnaamijyadu waxay bartilmaameed ka dhigan karaan dadka dhallin-yarada ah ee qaxootiga iyo soo-galootiga oo leh taariikh dugsi-dhigasho khalkhal soo gashay, iyo sidoo kale dadka soo dhammaystay waxbarashada dugsi-gareenka oo bilaabaya waxbarashada jaamacadeed.

Waxaa jira barnaamijyada kabidda ingiriisiga ESL-ka oo gaarka ah oo la siiyo qaxootiga iyo dadka dhallin-yarada ee dhawaanta yimid oo lagu bixiyo Northern Melbourne Institute of TAFE (Barnaamijka YAMEC oo ay bixiyaan Preston iyo Collingwood), Victoria University (TAFE) oo ku taal Footscray, iyo Machadka Chisholm oo ku taal Dandenong. Barnaamijyadan waxay aqoonsan yihiin in dadka dhallin-yarada ah oo soo maray taariikh dugsi-dhigasho khalkhal soo gashay ayna u baahan yihiin waxbarasho ballaaran iyo sidoo kale ingiriisi. Barnaamijyadan waxay bixin karaan xisaab, saynis, taknoolojiyadda macluumaadka, barnaamijyada madadaalashada, iyo sidoo kale caawimaad xagga arrimaha dejinta sida guryaha, Centrelink, iyo mowduucyada caafimaadka iyo sharciga. Ardayda waxay gali karaan barnaamijyadan ayadoon loo eegayn heerka ASLPR-kooda (luqadda iyo akhris-qoraalka).

Mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada Dhallin-yarada Qaxootiga ee TAFE-ka wuxuu xoogga saaraa taageeridda dadka dhallin-yarada ah ayagoo la sameeya iskaashiyo bixiyeyaasha adeegyada sida JPET, MIPs, JPP. Shaqaalaha taageeridda waxay si iskaashi ah u siiyaan adeegyadooda shaqaalaha barnaamijka Dhallin-yarada Qaxootiga waxayna hubin karaan in mowduucyada dejinta (sida guriyeynta, caafimaadka iwm) wax laga qaban karo.

Ardayda ESL-ka TAFE-ka waxay isku darsan karaan waxbarashada mihnadda iyo Ingiriisiga ESL-ka oo dheeraad ah, matalan Ingiriisiga & barashada Kombiyuutarka ama Ingiriisiga & Daryeelka Ilmaha iwm. Fasallo kale ayaa xoogga u saara akhris-qoraalka dadka ku-hadlidda Ingiriisigoodu fiican yahay, hase ahaatee kuwaas oo uga baahan caawimaad dheeraad ah akhrinta & qoraalka. Fasallada ingiriisiga waxaa la qabtaa maalintii iyo galabtiiba waxayna ahaan karaan kuwo waqti-buuxa ama waqti-dhimman.

Galitaanka Mac-hadyada TAFE-ka

TaFE-ku waxay leedahay qorshe galitaan is-bedbeddala; waxay aqoonsan tahay aqoonta iyo waayo-aragnimada laga helay daraasadaha rasmiga ah iyo kuwa lagu helay waayo-aragnimooyinka nolosha ayna ka midka yihiin waayo-aragnimada shaqo.

Haddaba mar kasta looma baahna in la soo dhammeeyey dugsi-dhigashada rasmiga ah si loogu qalmo

galitaanka TAFE-ka haddii la muujin karo in qofku haysto asaas kaleeto oo macquul ah. Xaaladaha qaarkood, asaaskan macquulka ah waxaa lagu heli karaa buundooyinka tixgelinta (credit) ee ay leeyihiin cutubyada qaarkood ee koorsooyinka TAFE-ka. Kuwaanna waxaa la yiraahdaa **Aqoonsiga Wax-barasho Hore (Recognition of Prior Learning - RPL)**

Galitaanka koorsooyinka qaarkood waa codsi toos ah ee machadyada TAFE-ka, hase ahaatee dadka kale gaar ahaan kuwa heerka Dibloomada ama Dibloomada Sare, waxaa lagama maarmaan ah in codsi loo qorto Hay'adda **Xarrunta Ogolaanshaha Jaamacadaha Victoria (Victorian Tertiary Admission Centre - VTAC)**. Sidaasna waa ina la sameeyaa Sebtemberta sannadka hore. Codsiyada soo daaha waxay la kulmayaan kharashka ganaaxa. Koorsooyinka TAFE-ka waxay bilaamaan sannad kasta bilaha Febraayo iyo Luuliyo (bartama sannadka dadka la qaato).

Wixii faahfaahin dheeraad ah kala xirriir Machadyada TAFE-ka.

Waddooyinka TAFE-ka ilaa Jaamacadda

Shahaadooyinka TAFE-ka waxaa loo adeegsan karaa in lagu galo koorsooyinka kale, oo ay ka midka yihiin koorsooyinka jaamacadaha. Ardayga soo dhammaysta koorsooyinka Dibloomada ama Dibloomada Sare wuxuu heli karaa buundooyinka tixgelinta cutubyada qaarkood oo looga sii gudbi karo digriiga jaamacadeed. Buundooyinka tixgelinta waxay u dhigmi karaan sannadka kowaad ee digriiga jaamacadda saddexda sano ah.

Kharashka Fasallada

Bixiyeyaasha TAFE-ka waxay qaadaan ujradda waxbarashada, waxaa kaloo ujad loo qaadaa adeegyada ardayda. Ujrooyinka TAFE-ka si weyn bay uga hooseeyaan kuwa ujrooyinka HECS-ka jaamacadda.

Ardayda qaadata Gunnada Dhallin-yarada, ama gunno kale oo Centrelink ah, waxay xaq u yeelan karaan wax-ka-dhimis. Ardaydu waxay u qalmaan inay badiba koorsooyinka ku helaan Gunnada Dhallin-yarada. Waxaad ka eegtaa wixii faahfaahin dheeraad ah Cutubka "**Taageero Dhaqaale - Income Support**".

Ammaahaha ardayda waxaa loo heli karaa inay ardayda ka taageeraan ujrooyinka waxbarashada, haddii loo baahdo.

Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?

Machadyada TAFE-ka waxaa laga helaa Melbourne oo dhan. Machad kastaa wuxuu leeyahay Sarkaalka macluumaadka oo ka caawiya ardayda wiixii su'aalo ah oo dhan. Waxaa kaloo jira adeegyo ay ka mid yihiin la-tashiga xirfadaha, ee ardayda la filayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan TAFE-ka iyo barnaamijyada ay bixiyaan fadlan kala tasho:

- Buuggayar oo ah "Questions and Answers About TAFE" (oo laga helo dugsiyada iyo maktabadaha dadweynah)
- Macluumaadka Victoria, ka wac: 1300 366 356
- Website-ka Xafiiska Tababarka iyo Waxbarashada Jaamacadeed oo ah: www.otte.vic.gov.au

Jaamacadaha (Universities)

Jaamacaduhu waxay bixiyaan koorsooyin aad u ballaaran, kuwaas oo qaarkood u horseedaan mihnad gaar ah sida caafimaadka, kalkaaliyenimada ama handasaha halka kuwa kalena sida farshaxanka ama sayniska ay wax guud yihiin.

Noocyada koorsooyinka laga helo:

- **Dibloomada:**
Waa 2 sano oo waqti-buuxa ah ama in u dhiganta oo daraasad waqti-dhimman ah. Xoogga waxaa la saaraa xirfadaha camaliga ah iyo fahanka guud ee xirfadaha, oo u horseedaya aqoonsiga shahaadooyinka xirfadeedka hooseeya (para-professional qualification)
- **Dibloomada Sare:**
Waa 3 sano oo waqti-buuxa ah ama in u dhiganta oo daraasada waqti-dhimman ah. Waxaa ka mid ah daraasad oo ka heer sarreeya Dibloomada, hase ahaatee wali waxaa xoogga la saaraa xirfadaha camaliga ah.
- **Digriiga Bajaloorka**
Waa 3-4 sano oo waqti-buuxa ah ama in u dhiganta oo daraasada waqti-dhimman ah. Ardaygu wuxuu u baahan doonaa inuu ku takhasuso ugu yaraan hal maaddo inta ay socoto koorsadu.
- **Shahaadada Graduate-ka**
Waa 6 bilood oo waqti-buuxa ah ama in u dhiganta oo daraasada waqti-dhimman ah. Waxaa ku jira xirfado ballaaran oo hore loogu soo qaatay koorsooyinka jaamacadda hore, ama horumarinta aqoonta mihnadaha iyo xirfadaha ee meelaha xirfadeedka ah.
- **Dibloomada Graduate-ka**
Waa 1 sano oo waqti-buuxa ah ama in u dhiganta oo daraasada waqti-dhimman ah. Waxaa ku jira xirfado ballaaran oo hore loogu soo qaatay koorsooyinka jaamacadda hore, ama horumarinta aqoonta mihnadaha iyo xirfadaha ee meelaha xirfadeedka ah, ama ku takhasusidda dheeraadka ah.
- **Digriiga Masters-ka**
Waa 2 sano oo waqti-buuxa ah ama in u dhiganta oo daraasada waqti-dhimman ah. Waxay kor-u-qaaddaa xirfadaha aqooneed ama mihnadeed. Ardaygu wuxuu si hoose u fahmayaa meelo gaar ah ee aqoonta, ha ahaato shaqada koorsada ama nashaadyada cilmi-baarista
- **Digriiga Doktoraytko**
Waa 3 sano oo waqti-buuxa ah ama in u dhiganta oo daraasada waqti-dhimman ah. Waxaa la siiyaa qaadashada mashruuc cilmi-baaris ah oo asali ah, oo uu ku jiro teesiska la taaban karo, kaas oo gacan ka gaysan kara aqoonta iyo fahanka meel gaar ah ee daraasaddaas.

Shuruudaha ugu Yar ee galitaanka

Si ay ugu xaq yeeshaan galitaanka jaamacadda, ardaydu waxay u baahan yihiin inay si fiican u soo dhammaystiraan VCE-da, ama ay sii wadaan waddada laga soo bilaabo koorsada TAFE-ka, ama ay u qalmaan galidda **Qaanuunka Galitaanka Gaarka ah (Special Entry Provisions)**.

Qaanuunka Galitaanka ee Gaarka ah (Special Entry Provisions)

Codsadeyaalka aan ahayn kuwa dugsiyada ka baxay waxay TAFE-kii kastaaba tixgelisaa si shakhsiyah ah halka ay codsan karaan. Machadyadu waxay tixgeliyaan taariikhda shaqada codsadhaha, daraasadaha wixii ka dambeeyey dugsiga sare ama duruufo gaar ahaaneed. Galitaanka waxaa lagu salayn karaa hal ama ka badanba oo sababao kale ah sida da'da qaangaarnimada, dacdarro waxbarasho ama bulshadeed, ama kartida in la guulaysto. Codsadeyaalka waxaa looga baahan karaa inay imtixaan u fariistaan si ay u muujiyaan inay leeyihiin kartida ay ugu guulaystaan inay wax ka bartaan heer jaamacadeed.

Shuruudaha koorsooyinka ee ardayda soo dhammaystay VCE-da.

Isla markiiba uu ardaygu gaaro shuruudaha galitaanka ee ugu hooseeya, asagu ama ayadu waxaa kaloo laga doonayaa inay ka soo baxaan shuruudaha koorsooda gaar ahaaneed ee koorso kasta oo ay jecel yihiin inay soo codsadaan.

Shuruudahan koorsooyinka waxaa ka mid ah:

➤ **Daraasado Horudhac ah:**

Kuwaani waa daraasado ay tahay in si fiican loo soo dhammaystiro ka-hor intaan ardaydu loo qaadan koorso gaar ah.

➤ **Celceliska Grade-ka:**

Mararka qaarkood, ka-hor intaan daraasad loo tixgelin inay horudhac u tahay koorso kale, waa in buundada qaarkeed oo ah **Shaqooyinka Dugsiga Lagu-soo-qiimeeyo (School Assessed Tasks - SATS)** ee maaddo gaar ah la helaa ama la gaaraa.

Sidee loo codsadaa galitaanka koorsooyinka jaamacadaha Victoria

Hay'adda **Xarrunta Ogolaanshaha Jaamacadaha Victoria (Victorian Tertiary Admissions Centre - VTAC)** ayaa kala saarta codsiyada loo soo qorto badiiba koorsooyinka digriiga ama dibloomada ee jaamacadaha iyo badi koorsooyinka waqtiga buuxa ee Shahaadada IV, Dibloomada iyo Dibloomada Sare oo lagu bixiyo Machadyada TAFE-ka ee Victoria. Luuliyo kasta VTAC waxay soo saartaa buug-yar oo codsi ah, oo la dhaho "**VTAC Guide to University and TAFE courses**", kaas oo ay ku jiraan macluumaadyada koorsooyinka, hab-raacyada codsiyada iyo foomka codsiga. **Codsiyada** koorsooyinka undergraduate-ka sida caadiga ah waxay xirnaan September ee sannadka ka-horreeya xulashada.

Xulashada koorsooyinka oo dhan waa mid tartan ah wuxuuna ku salaysan yahay mudnaanta aqooneed, marka laga reebo xoogaa kiisaska gaarka ah halkaas oo shuruudo kaleeto la tixgesho, oo ay ka midka yihiin waayo-aragnimada shaqo, xirfadaha gaarka ah, itijaaha ama ku habboonaanta xirfadda.

Mashruuca Deeqda Waxbarashada Sare (Higher Education Contribution Scheme- HECS)

Deganeyaasha joogtada ah waxay sida badan iska bixiyaan ujooyinka koorsooyinka oo ay ku bixiyaan Mashruuca Deeqaha **Higher Education Contribution Scheme (HECS)**. Deeqaha HECS ee ardayga waqtiga-buuxa ah oo samaynaya barnaamijka caadiga ah ee daraasad ugu yaraan sannadka oo dhan ah waxay u dhaxaysaa \$3,500-\$6,000. Bixinta lacagtaas sida badan waxaa loo dib dhigaa ilaa dhakhliga la canshuuri karo oo ilaa heer ah la helo, markaasna boqlkiiba dakhligaas ayaa dib loo bixiya oo la siiyaa Xafiiska Canshuuraha Australia (Australian Taxation Office).

Koorsooyinka qaarkood ee lagama qaado HECS hase ahaatee waxaa la bixiyaa ujradda oo dhan ee koorsooyinka oo horumaris ah oo ka bilaamaysa ilaa \$10,000 sannadkiiba.

Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?

Waxaad ka eggtaa website-ka Department of Education, Science and Training's (DEST) Higher Education oo ah: <http://www.dest.gov.au/highered/index1.htm>

Sidoo kale, jaamacad kastaaba waxay soo saartaa buuggagta macluumaadka oo ay ku jiraan dulmarka koorsoadii kastaba. Taasna waxaa laga helayaa ayadoo la waco si gaar ah jaamacaddii kasta.

Bal wixii ku saabsan xulashada jaamacadaha iyo hab-raacyada kala xirriir si toos ah Victorian Tertiary Administrations Centre (VTAC) ama ka wac: 1300 364 133 ama ka eeg website-ka oo ah: www.vtac.edu.au or write to:

The Information Officer
Victorian Tertiary Administrations Centre (VTAC)
Suite B, 40 Park Street
SOUTH MELBOURNE VIC 3205

Taageero Dhaqaale

Centrelink waxay siisaa xoogaa taageero lacageed iyo kaalmooyin kale dadka dhallin-yarada ah iyo ardayda marka ay waxbaranayaan.

Gunnada Dhallin-yarada (Youth Allowance)

Waxaa loogu talo-galay :

- Ardayga waqti-buuxa waxbarta oo da'dooduna tahay 16-24 sano.
- Ardayda waqti-buuxa waxbarata oo da'doodu tahay 25 ama ka korba kuwaas oo qaadan jirey Gunnada Dhallin-yarada ka-hor intaysan gaarin 25 sano kuwaas oo isla haddana samaynaya koorsada.
- Dadka kale ee dhallin-yarada ah oo da'doodu tahay ilaa 21 kuwaas oo raadinaya shaqo waqti-buuxa ah, ama kuwa isku wada shaqo waqti-dhimman iyo waxbarsho waqti-dhimman, ama kuwa samaynaya nashaadyo laysla ogolaaday (oo ay ka mid tahay shaqada iskaaga ah), ama kuwa xannuunsan; iyo
- Kuwa jira 15 sano oo gaarey da'dii dugsi ka tegidda, loona arko inay madax-bannaan yihiin.

Ardayda ka yar 18 sano kuwaas oo aan soo dhammaysan sannadka 12aad ama in u dhiganta ma helayaan Gunnada Dhallin-yarada ilaa ay isku qoraan waxbarasho ama tababar waqti-buuxa ah. Si ay u helaan Gunnada Dhallin-yarada waxaa laga doonayaa inay dugsiga dhigtaan, ama dugsiga ku noqdaan, inay isku qoraan TAFE-ka ama koorsooyinka kale ee loo ogolaaday. Ka-dhaafidda shuruudahan ayaa la heli karaa haddii aysan ku habboonayn amase aysan suurta-gal ahayn.

Qiyaasaha Gunnada Dhallin-yarada waxay ku xiran yihiin bal in macaamiishu ay dulsaar ku yihiin waalidiintooda ama loo arko dad madax-bannaan, keli ah, carruur haysta, guriga ku nool yahay ama uu u baahan yahay inuu ku noolaado meel aan guriga ahayn si uu wax u barto ama kor-ugu-qaado fursadaha shaqadooda.

Wixii macaamiil ah oo qaata qiyaasta dadka dulsaarka ku ah waalidkood ee Gunnada Dhallin-yarada, xaq-u-yeelashada iyo qiyaasta gunnada ay xaq u leeyihiin waxay ku xiran tahay dakhligawaalidkooda, hantida iyo waliba nolosha runtaa ee qoyskooda. Taageerada kirada waxaa kaloo la siiyaa dadka kiraysta guryaha gaarka ah, wixii macluumaad dheeraad ah ka raadso Centrelink.

Lacagaha Austudy (Austudy Payment)

- waxaa loogu talo-galay ardayda da'doodu tahay 25 iyo ka korba oo samaynaya koorso waqti-buuxa ah oo loo ogolaaday oo ka samaynaya hay'ad sharciyaysan. (ardayda leh iimaha waxaa lagu caawin karaa waxbarashada waqtiga-dhimman ah)

Gunnada Gaarka ah

Waa lacag la siiyo dadka ay hayso dhibaato dhaqaale iyo mid qof ahaaneed hase ahaatee uma xaq laha lacagaha kale ee ay Centrelink bixiso.

Qiimaynta Dhakhliga iyo Hantida

Markii ay suurta-gal tahayba waalidiinta waxaa lagu dhiirgeliyaa inay taageeraan dadka dhallin-yarada ah ilaa ay ayagu gaaraan inay taageeraan doorashooyinka noloshooda. Ayadoo taas loo eegayo, duruufaha dhaqaale ee waalidiinta waa la tixgeshaa markii loo qiimaynayo Gunnada Dhallin-yarada ee dadka dhallin-yarada ah ee dulsaarka ku ah waalidkooda.

- **Qiimaynta Dakhliga Waalidka (Parental Means Test)** waxa kaliya oo loo sameeyaa dadka dhallin-yarada ah ee dulsaarka ku ah waalidkooda oo qaata Gunnada Dhallin-yarada, waxayna eegaysaa hantida waalidkooda, dakhliga iyo mararka qaarkood nolosha runtaa ee qoyskooda si loo

qiyaaso bal inay dhaqaale ahaan taageeri karaan carruurtooda.

- **Qiimaynta Dakhliga ee Qof ahaaneed (Personal Income Test)** – Qiyaasta lacagta Gunnada Dhallin-yarada ama Austudy waxaa saameeya inta uu helo qof kastaa labadii asbuuca.
- **Qiimaynta Hantida ee Qof ahaaneed (Personal Asset Test)** tani waxay khusaysaa codsadeyaalka Austudy iyo sidoo kale codsadeyaalka Gunnada Dhallin-yarada.
- **Qiimaynta Dakhliga iyo Hantida Wadayga (Partner Income and Assets Tests)** tani waxay khusaysaa codsadeyaalka Gunnada Dhallin-yarada iyo codsadeyaalka Austudy kuwaas oo ah xubin labada qof ee isqaba.

Deganaanshaha

Si ay u helaan lacagahaas, codsadeyaalku waa inay badiba ahaadaan deganeyaalka Australia oo si guudna ugu nool Australia. Ardayda waqtiga – buuxa mararka qaarkood lacag ayaa la siin karaa marka ay Australia dibadda ka jiraan. Soo-galootiga dhawaanta yimid waa inay sugaan 2 sano ka-hor intaysan helin lacagaha Gunnada Dhallin-yarada ama Austudy – fiisada qaxootiga iyo tan Insaanimada dadka haysta ayagu kuma jiraan. **Haddii turjumaan loo baahdo, waxaa loo diyaarin karaa turjumaan ayadoo lacag la'aan ah.**

Gunnooyin Dheeraad ah

Lacagaha soo socda ayagana waa la heli karaa.

Taageerada Kirada waxaa heli kara qateyaasha Gunnada Dhallin-yarada kuwaas oo aan ku noolayn gurigooda si ay wax-u-bartaan ama raadinaya shaqo kuwaas oo bixiya kiro.

Lacagta Horumarinta oo aan dulsaar lahayn iyo Horumarinta Shaqaalaynta Gaarka ah: Qateyaasha Gunnada Dhallin-yarada iyo Austudy waxay heli karaan Horumarinta lacagtooda oo aan dulsaar lahayn. Horumarinta Shaqaalaynta gaarka ah waxaa heli kara qateyaasha Gunnada Dhallin-yarada iyo Austudy.

Si looga caawiyo kharashka safarka ay kaga tagaan guriga kuna yimaadaan goobta waxbarashada, ardayda jaamacadda qaarkood ayaa heli kara **Gunnada Safarka (Fares Allowance)**.

Amaahaha ay qaataan ardayda Jaamacadaha. Amaahda kabidda Dhaqaalahu waa mashruuc amaaheed iskaa ah oo loogu talo-galay ardayda jaamacadaha kuwaas oo xaq-u-leh inay qaataan lacagaha Gunnada Dhallin-yarada waliba ardayda jaamacadaha qaarood kuwaas oo aan u xaq lahayn Gunnadaha Dhallin-yarada oo ay ugu wacan tahay Qiimaynta nolosha waalidkooda Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg Centrelink.

Dakhliga Bankiga (Income Bank). Markii arday qaata lacagta Gunnada Dhallin-yarada ama Austudy uu leeyahay dakhli labadii asbuuc oo hoos timaadda meelaha dakhliga ka madaxbannaan, waxaa la abuuraa dakhliga bangiga. Bangigu wuxuu ardayda u ogolaanayaa inay gaaraan kareedhitka dakhliga (ugu badnaan \$6000) si ay u barbarrayso dakhliga ay gadaal ka helaan (oo ay ku jirto fasaxyada) oo ka badan meelaha ka madaxbanaan dakhligaha oo aan saamaynta saasa ku lahayn lacaga ay qaataan.

Kaarka Daryeelka Caafimaadka (Health Care Card) wuxuu kuu dhaqaalaynayaa lacagta aad ka bixiso daawooyinka dhakhtarku soo-qoro. Raadsheyaasha shaqadu waxay si atoomatik ah ugu xaq leeyihiin Kaarka Daryeelka Caafimaadka, ardayda waqtiga-buuxda waa inay si gaar ah u soo codsadaan ayna soo raaciyaan faahfaahinta dakhliga.

Gunnada Farmashiga (Pharmaceutical allowance) Waxaa la siin karaa qateyaasha lacagaha Gunnada Dhallin-yarada ama Austudy kuwaas oo xannuunsan oo si ku meel-gaar ah aan wax qabsan karin.

Adeegyada Centrelink ee Dhallin-yarada

... xataa kuwa aan helin lacagaha Centrelink.

Kooxaha Dhalinyarada waxaa laga helaa Xafiiska Centrelink waxayna la shaqeeyaan dadka dhallin-yarada ah si ay ugu caawiso inay fahmaan ayna helaan doorashooyinkooda waxbarasho, tababar iyo shaqo iyo inay helaan xaq-u-yeelashadataageeridda dhaqaale.

Takhasusleyaalka Goobaha U-adeegidda dhallin-yarada waxaa ka mid ah Adeegeyaasha Bulshada (Social Workers) iyo takhasusleyaal kale kuwaas oo bixiya:

- Caawimaad la siiyo dadka dhallin-yarada ah kuwaas oo aan guri lahayn;
- Soo-dhexgalka hore ee dadka dhallin-yarada ah oo khatarta ugu jira inay dugsiga mar hore ka tagaan;
- kala-talin xirfadaha degdegga ah iyo shaqada; iyo
- meelo kale u- dirid.

Xaruumaha Macluumaadka Xirfadaha waxay bixiyaan helitaanka lacag la'aanta ah, macluumaad ay fududahay adeegsigiisa oo ay ku jiraan dhammaan noocyada xirfadaha iyo koorsooyinka. Waxaa jira 12 oo xaruumahan ka mid ah oo ku yaal magaalo madaxyada iyo magaalooyinka muhiimka ah ee gobollada Xaruun kastaa waxay leedahay xulashada buuggagta iyo fiidiyowyada koorsada, iyo sidoo kale macluumaad daabacan oo kombiyuutaraysan si ay u caawiso qorshaynta xirfadda, loo qoro codsiyada iyo resumeega shaqada iyo loo diyaariyo waraysiyada.

Tas-hiilaadka Iskaaga ah waxaa laga helaa xafiisyada Centrelink oo dhan oo ay ka midka yihiin:

- Liisaska Touchscreens ee shaqooyinka bannaan;
- Taleefoonka, fotokoobiga iyo fax-ka;
- Kombiyuutarrada si loogu diyaariyo codsiyada iyo resumeega shaqada, iyo helitaanka intarneedka;
- Tilmaameyaasha shaqada, bamfaliidyada iyo boodhadhka ogaysiisyada lagu dhejiyo

Waajibaadka qofka ee Centrelink

Macaamiishu waxay leeyihiin xilka inay Centrelink soo ogaysiiyaan marka ay is-beddelaan duruufahoodu maaddaama uu is-beddelkaasi saameeyo lacagtooda.

Aadidda waddanka dibaddiisa waxay saamayn ku leedahay lacagta la qaato, sidaas darteed u sheeg centrelink wixii qorshe safar ah.

Is-barbar-dhigidda macluumaadka wasaaradaha kale ee dowladda. Centrelink waa in mar kasta la siiyaa faahfaahin sax ah sababtoo ah hubin ayaa laga sameeyaa wasaaradaha kale ee dowladda iyo hay'adaha waxbarashada.

Wixii macluumaaddheeraad ah ee luqadaha aan Ingiriisiga ahayn, waxaad wacdaa 13 1202 ama weyddii Xaashida Macluumaadka ee Caawimaadda Dadka dhallin-yarada iyo Ardayda ah "Help for Young People and Students" (17 luqadood) xafiiska Centrelink ama intarneedka ah:

<http://www.centrelink.gov.au./internet/internet.nsf/multifilestores/yps0112>

Ilaha macluumaad dheeraad ah (Sources of Further Information)

Tixraacyada Guud

- **Tusaha Shaqooyinka iyo Koorsooyinka (Job and Course Explorer (OZJAC))**, adeeg macluumaad kombiyuutar ku jira oo ku saabsan waxbarashada iyo xirfadaha waxaa laga heli karaa dugsiiyo badan iyo maktabadaha degaannada. Waxaa kaloo jira tilmaamaha koorsooyinka ee OZJAC.
- The Job Guide, oo ay soo saarto **Wasaaradda Waxbarashada** ee Commonwealth Department of Education, Science and Training (DEST). Ka raadi tilmaamahan maktabadda dugsigaaga ama Centrelink degaankaaga.
- Waxaad kaloo eegtaa buugga macluumaadka hay'adaha jaamacadeed.

Macluumaadka VCE-da ee guud (For VCE Information in general)

Information section

Victorian Curriculum Assessment Authority - VCAA

41 St Andrews Place

EAST MELBOURNE 3002

Phone: (03) 9651 4300 Fax: (03) 9651 4324

Website: www.vcaa.vic.edu.au

Macluumaadyada la xirriira waxbarashada aqoon-dirsadka

Distance Education Centre Victoria

315 Clarendon Street

THORNBURY VIC 3071

Phone: (03) 8480 0000 Fax: (03) 9416 8493

Website: www.distance.vic.edu.au

Macluumaadka waxbarashada Guud oo loogu talo-galay waalidiinta

Buugga tilmaamaha ah ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka oo loogu-talo-galay waalidiinta kuna saabsan daymoodka Waxbarashada dugsiyada Dowladda Victoria "A-Z Guide for Parents: Education in Victorian Government Schools at a glance" (ayna ku jiraan turjumidda 12 luqadood oo aan Ingiriisiga ahayn):

Website-ka: www.sofweb.vic.edu.au/lem/esl/azguide.htm

Wixii macluumaad ee ku saabsan barnaamijyada ESL-ka ee dugsiyada iyo macluumaadka VCE-da oo ku turjuman 14 luqadood ka eeg:

Website: www.sofweb.vic.edu.au/lem/esl/index.htm

Macluumaadka la xirriira TAFE-ka

Office of Training and Tertiary Education (OTTE)

2 Treasury Place

EAST MELBOURNE VIC 3002

Phone: (03) 9637 2000 Fax: (03) 9637 2470

Website-ka: www.otte.vic.gov.au

Taleefoonka Koorsada TAFE-ka: 131823

Macluumaadka ku saabsan shaqada, TAFE-ka iyo Jaamacadda

Melbourne Career Information Centre

1st Floor, 176 Bridge Road

Richmond 3121

Phone: (03) 9299 1038 Fax: (03) 9299 1099